

*Wacitaanka waa amar maxkamad ee shaqiga u sheega in maxkamad uu iska soo xadiiriyo si uu uga maragfuro inta maxkamadda wax sida dacwadda ahi ay ka socoto. Marqaatiyaasha la wacay waxa ay hayaan macluumaadk gaara ee ku saabsan dembiga meesha ka dhacay. Marqaatiyada inta badan waxa ay aaminsanyihiin waxa ay dembiga ka ogyihiin aysan sidaasi muhiim u ahayn. Waxaa dhici karta in macluumaad yar uu door weyn ka qaadan karo sidii lagu ogaan lahaa waxa dhabta ah ee meesha ka dhacay uuna raad ku reebo naatijada dacwadda ka soo baxaysa.*

*Dhibbanayaal iyo marqaatiyaal fara badan ma yaqanaan qaabka ay maxkmadda ku shaqeyso. Waxa ay noqon karaan kuwo cabsanaya ama ficil qiiro ama walaac badan ka muujiya waxa ku saabsan doorkooda iyo masuuliyadahooda. “Waanooyin sida Maxkamadda Dembiyada Looga Maragfuro” aya la bixiyaa si walaacan wax looga qabto.*

## KADDIB MARKII WACITAANKA LAGUU SOO DIRO

**Wacitaanka si taxaddiran u aqriso.** Waxa ay ku sheegaysa tilmaan-bixinno ku saabsan waqtiga iyo meesha aad maxkmadda isaga xaadirin lahayd. Haddii aad heshid *Wacitaanka Qofka Magacaaban (Subpoena Duces Tecum)*, waxaa lagugu amrayaa in aad maxkamadda horay ugu soo qaadato shay, macluumaad, ama dukumiinti. Haddii aad walaac ka qabtid waxa lagu weydiiyay, waa in la soo xariirtid xafiiska xeerilaaliyaha sida ugu dhaqsa badan.

**Xeerilaaliyaha xafiiskiisa la soo xariir haddii aad u baahantahay adeegyada turjubaanka ama aad tahay qof qaba xaalado caafimaad sababo naafonnimo la xariirta.**

**Xeerilaaliyaha xafiiskiisa la soo xariir haddii aadan imaan karin taariiqda maxkamadd lagu qabtay.** Laakiin waxaa dhici karta haddii waqtiga la baddalo ay taasi sabab u noqon karto dib u dhac kiiska maxkamadda ku yimaada oo toddobaadyo ama bilo qaadan kara, waxayna u badan tahay in uusan garsooraha waxba ka baddalin waqtiga ballanka.

**Waxa aad ogaataa in meesha ay ka imaan karaan arrimoculus oo sharciga la xariira haddii waqtiga wacitaanka aad soo xaaridi weydid.** Waxaa kaloo dhici karta in aad dembi xaqiraadda maxkmadda lagugu soo oogo, garsooruhuna uu soo rogo amar lagugu soo qabanayo.

## KAHOR INTA AADAN MAXKAMADDA IMAANIN

**Dib u eeg macluumaadka qoraalka ama kuwa cajalad ku duuban ee kiiska la xariira.** Waxa aad codsan kartaa koobi kasta ee qoraala ee xeerilaaliyaha xafiiskiisa ka socda. Xafiiskaas la soo xariir haddii aad wax qalada ku aragtid warqaddaada.

**Uma baahnid waxkasta oo aad sheegi lahayd in aad kor ka xasuusatid.** Waxaase iskudaydaa in aad waxa aad ka xasuusatid sawirka dhabta ee waxa dhacay (sida, goobta, waqtiga, dadkii goobta joogay, iyo waxa meesha laysku yiri) sii markaasi adiga oo kalsooni haysta aad jawaabahaaga bixiso.

**Uma baahnid in aad cidkale kala hadashid waxa ku saabsan marqaatigaaga.** Haddii uu qof kaala soo xariiro waxa ku saabsan marqaatigaaga, kaliga ayaa iska leh go'aanka qof aad doonto aad kala hadasho ama aadan kala hadlin.

**Haddii uu qof kula soo xariiro ama ku handado si uu maragfurkaaga saamayn ugu reebo ama iskudaya in uu ishortaago in aad maxkamad hortimaado, xeerilaliyhaha xafiiskiisa iyo boliiska degaankaga sid ugu dhaqsiya badan la soo xariir.** Faragalinta ka maragfurka maxkamadda waa dembi, eedaysanaha sharciga ayaa lala tiigsanaya.

**Hawlaha maxkma waxa dhacda in hadiyo jeer la bad-badalo.** Xeerilaaliyaha xafiiskiisa kala hadal wixii isabadda-la cinwaankaaga iyo telefoon lambarkaaga. Xeerilaaliyaha xafiiskiisa waxaa laga rabaa in uu ku soo ogaysiiyo wixii isbaddala ee jadwalka haddii maxkamad aad ka maragfurid u imaanaysid ama lagaa soo wacay. Waxaase jirta in ay qummantahay in aad adiga soo wacdid maalinka ay maxkamadda dhacayso maalinka ka horreeya si aad ku habsatid in dawcwaaddu ay weli jadwalka ku jirto iyo joogitaankaaga uu muhiim yahay.

**Waa in aad taqaanid meesha aad u socotid.** U doodaha dhibbanaha ama xeerilaaliyaha weydii waxa ku saabsan meesha aad maxkamadda isaga xaadirin lahayd inta aad maragfurkaaga la gaarin.

**Sharciyan waxa aad xaq u leedahay in lagu siiyo xoogaa lacago dhaadhac ah si aad ku kabgto mushaarka, gaadiidka, iyo qarshyo kale ee la xariira imatinkaaga maxkmadda.** Warqadda wacitaanka dhinaceeda kale ka eeg warqadaha lagaa rabo in aad horay maxkamadda ugu soo qaadatid, ama kaaliyaha maxkmadda weydiiso sida aad ku heli lahayd abaalmarinta.

## XAQA Dhibbanaha Iyo Marqaatiga

**Dhibbanayaasha iyo marqaatiyada laguma xirayo in ay soo gudbiyaan cinwaannada guriyaha iyo shaqada, ama taariiqada dhalashada, lambarka telefoonka maxkmadda horteeda waa haddii uusan garsooraha weydiisan in macluumaadkan yahay daalil muhiima.** Dhibbanayaasha iyo marqaatiyadu waa in xeerilaaliyaha u sheegaan rabi-taankooda ku aaddan in macluumaadkan laga dhigo kuwo qarsoodi ah inta ay dacwaddu socoto.

**Dhibbanayaasha qaarkood xaq ayay u leeyihiin in ay la yimaadaan qof ku caawiya marka ay maragfurayaan.** Kuwaan waxaa ka mida dhibbanayaasha ka maragfuraya kiisaska saqajaannimo looga arrinsanayo qof dhallin yar iyo dhibbane dhallin yar ee la xariira kiisas xadgudubka caruurta ama fal bahdilid ah.

**Maxkamaddu waxay go'aamin kartaa dacwad dadweynaha ka xiran marka uu jiro maragfurka qof dhallin yar ee kufasho loo geystay.** Caadiyan, tan waxa ay dhacaysaa marka xeerilaaliyaha uu sidaasi ku codsado. Dhinacyada ay dacwadda ku socoto oo idil waxaa la wada siinayaa fursad diidmo ee inta aysan maxkamaddu go'aan ka gaarin haddii ama haddii aan maxkmadda la xirayo.

**Sharciyan maxkamadda waxaa laa rabaa in laba qaybood ee sugitaanka dhibbanayaasha ay samaysato, haddii la heli karo,** ama la siiyo fursado kale ee ammaanka lagu ilaalinayo si loo yareeyo iskahorimaad dhexmara edeysaynaha iyo taagerayaashiisa/taageerayaasheeda. Xeerilaaliyaha xafiiskiisa aya macluumaadka ku saabsan lagu helayaa meesha aad maxkamadda ku sugi lahayd inta aadan maragfurin.

**Sharciyan loo shaqeeyahaaga kuma uu ciqaabi karo sababo la xariira in aad shaqada fasax ka qaadatay halwo maxkamad bacdama lagaa soo wacay.** Haddii ay shardi noqoto in aad shaqada uga baaqatid, waa aad in u sheegtid loo shaqeeyahaaga marka laguu soo diro warqadda wacitaanka. Xasuuso in taariiqaha in hadiyo jeer la bad-baddalo.

## TUSMOYINKA MARAGFURKA

- Adiga oo isku kalsoon waxa aad aaddaa halka marqaatiyada ay tagaan cod uu qof kasta ku maqli karana uga jawaab su'aalaha lagu weydiiyo.
- Si fiican ugu fariiso kursiga marqaatiga oo gacmahaaga, lugaha iyo kursiga wax shanqara ha ku samayn. Lama oggola in xanjo la calaanjiyo ama afka gacmahaaga lagu daboolo.
- Si run ah iyo saxan uga jawaab bixi ereyo aad adiga dooratday.
- Marna ha ka cabsan in aad falka dambiga aad dad kale kala hadashay, sida sarkaalka boliiska, baaraha ama xeerilaaliyaha.
- Inta aadan haldin ka fiirso waxa aad oran lahayd. Haddii aadan fahmin su'aal lagu weydiiyay, sidaa dheh oo ha la'igu soo celiyo si kale ha la'igu weydiyo dheh. Marna ha jawaabin su'aal aadan fahmin.
- Waxa aad qaladid ama aan caddayn isla markiiba iska sax. Haddii ay kula tahay in aadan ku jawaab celin karin "haa" ama "maya" qareenka u sheeg iyo weydiiso in wixii lagu fasiro.
- Jawaabo cad bixi haddii ay surtagal tahay. Haddii aadan waxa xasusan ama aqoonayn, sidaas ugu jawaab. Wax aadan ogayn ha qiyaasin. Haddii ay dhacdo in aad waqti iyo cabbir qiyaasaysid, si cad u sheeg in ay yihiin wax aad qiyasaysid oo kaliya.
- Aqlaaq, masuul, macaamil fiican la imow. Qarennada qaarkood waxa ay iskudayi doonaan in kaa ay caraysiyaan. Degganaasho ha lagaa arko, muranka iyo jees-jeeskana iska ilaali.
- Isla markiiba aamus haddii uu garsooraha ama qareenka uu hadal diidma ah ka soo yeero. Sug oo waxba ha oran illaa garsooraha uu ku amro in aad hadalka sii wadato.
- Haddii lacag lagu siinayo si aad maxkamadda u timaadid, si toosa ugu sheeg in qarashka kaa baxa lagu soo celinayo.

## CARUURTA MAXKAMADDA LA HORKEENAYO

Mararka qaarkood caruurta, xitaa kuwo aad u da' yar, ayaa laga waca si ay uga maragfuraan dacwadda. Sida dadka waaweyn, caruur badan ay shaki iyo kalsooni xumo badan ka muujiya arrinkan waxana laga yaabay in aanay fahamsanayn sababta ay maxkamadda u tagayaan. Waalidka iyo daryeel bixiyeaasha waa in ay u caruurta ka dhaadhiciyaan in aysan jirin wax dhibaata ee soo gaaraya ama canaan iyo xarig toona. Si caruurta loogu diyaariyo maxkamad la hortagayo waxaa loo mari karaa hawl adag sidii looga dhaadhicin lahaa in aysan waxba ka cabsan.

Canugga ha lala hadalsiiyo xeerilaaliyaha inta aan dacwadda la bilaabin si canugga loogu diyaariyo ka maragfurka iyo ka jawaabidda su'aalaha. Iska hubso in xeerilaaliyaha uu si fiican u fahamsan yahay canugga karaanka korriimadiisa iyo in ay jiraan xaalado caafimaad ee daran. Tani waxa ay tahay waqtiga ugu fiican ee la kormeero maxkamadda.

Canugga ka dhaadhici in aysan wax dhiba lahayn haddii asaga ama ayada aysan ogayn jawaabta su'aasha la weydiiyay.

Xeerilaaliyaha kala hadal in meesha goodbjoog ka ahaado qof canugga kaalmeeya inta uu canugga maragfurayo iyo fursadda uu canugga u haysto in uu maxkamadda la yimaado wax uu jecelyahay (sida boombolo daayer) marka la soo istaajiyo.

### NALAGA SOO XIRIIR

Office of Justice Programs  
445 Minnesota Street, Suite 2300  
St. Paul, MN 55101-1515

limayl: [dps.justiceprograms@state.mn.us](mailto:dps.justiceprograms@state.mn.us)  
Shabakadda internetka: [dps.mn.gov/divisions/ojp](http://dps.mn.gov/divisions/ojp)

651-201-7300 Telefoonka Guud  
888-622-8799 Telefoonka Lacagla'aanta  
651-205-4827 Khadka Dadga Maqalka Culus (TTY)  
651-296-5787 Fakis

6/11

TIPS ON TESTIFYING - SOMALI

# TUSMOOYIN KA HADLAYA MARAGFURKA MAXKAMADDA DEMBIYADA



XAFIISKA BARNAAMIJKA  
CADDALADDA

WAAXDA AMMAANKA GUUD EE MINNESOTA

OFFICE OF JUSTICE PROGRAMS  
MINNESOTA DEPARTMENT OF PUBLIC SAFETY